ungdata | OSLOMET STORBYUNIVERSITETET VELFERDSFORSKNINGSINSTITUTTET NOVA

# Warbixin ku socota waalidka iyo carruurta/dhallinyarada kuna saabsan baaritaanka macluumaadka dhallinyarada (ungdataundersøkelsen)

**Waxaa sanadkaan dugsiga ilmahaaga ka dhici doona baaritaanka macluumaadka dhallinyarada. Dhammaan ardayda dugsiga iyo degmada waa lagu casumay in ay baaritaanka ka qaybqaataan. Ujeeddadu waa in fikrad fiican laga helo xaaladda carruurta iyo dhallinyarada ee degmada, sidaas darteed waxaa muhiim ah in ay dadka ugu badan ee suurtaggalka ah ka qaybqaataan. Baaritaanku dugsiga ayuu ka dhacayaa gu'ga dhexdiisa.**

## UJEEDDADA BAARITAANKA

- Carruurta iyo dhallinyarada in la siiyo fursad ay siyaasiyiinta deegaanka iyo mas'uuliyiinta ugu sheegaan sida ay tahay in degmada lagu koro.
- Aqoon cusub loo yeesho xaaladaha korriinka ee carruurta iyo dhallinyarada ee degmada loona isticmaalo hawlaha ay degmadu u qabato dadka da'daan ah.
- In la helo fursad lagu barbardhigo degmooyinka kale iyo tirooyinka dalka, gacanna laga geysto cilmibaarista.

## MAXAAN KUGU WEYDIIN DOONNAA MACLUUMAADKA DHALLINYARADA?

- Xiriirka lala leeyahay dugsiga, saaxiibbada iyo waalidka
- Wakhtiga firaaqada la yahay iyo waxyaalaha wakhtigaas la qabto
- Isticmaalka saxaafadda
- Caafimaad, ka-helitaan iyo tayada nolosha
- Dhibidda

## Dugsiyada dhexe waxaan weydiin doonnaa:

- Jebinta xeerarka, gacanqaadka iyo sakhrad
- Heerka waxbarasho ee waalidka

## SIDEE AYAA LOO FULIYAA MACLUUMAADKA DHALLINYARADA?

- Hal xisad ayaa loogu tala galaa in baaritaanka laga jawaabo.
- Baaritaanku wuxuu u dhacaa si elegtaroonig ah ayada oo bogga jawaabta ee macluumaadka dhallinyarada lagu gelayo fure aan horey loo sii aqoon oo hal mar shaqaynaya.
- Ardaydu waxay jawaabayaan ayaga oo istillaab saaraya foomka su'aalaha. Waa suurtaggal in laguu akhriyo su'aalaha foomka. Qofkii sidaas doonaya waa in uu isticmaalaa xargaha dhegaha la gashado ee wax lagu dhegaysto.

## ILAALINTA MACLUUMAADKA QOFKA

- Baaritaanku waa qarsoodi, suurtaggal ma aha in qofka laga garto macluumaadka la soo aruuriyo.
- Marka la soo bandhigo natiijooyinka baaritaanka, lama garan doono qofka iyo jawaabta gaarka ah ee uu baxshay.

## XOR AYAA LOO YAHAY IN LAGA QAYBQAATO

- Ka qaybqaadashada baaritaanka xor ayaa loo yahay.
- Dadka ka jawaabaya way ka boodi karaan su'aalaha aysan doonayn in ay ka jawaabaan, haddii ay rabaanna ayaga oo dhexda maraya ayay isaga hari karaan.
- Waalidkuna way ka reebi karaan in ay ilmahoodu ka qaybqaataan iyaga oo u sheegaya macallinka xiriiriyaha ah/dugsiga.

## DIYAARGARAW

Adeegga caafimaadka ee dugsigu diyaar ayuu u yahay ardaydii u baahata baaritaanka kaddib.

## YAA MAS'UUL KA AH MACLUUMAADKA DHALLINYARADA?

Baaritaanka waxaa fulinaya Machadka cilmibaarista samafalka NOVA ee OsloMet – jaamacadda magaalada weyn iyo xarunta aqoonta sakhradda ee gobolka (KoRus), ayaga oo shaqada u qabanaya degmada.

## SU'AAL MA QABTAA?

La xiriir dugsiga ama KoRus-ka gobolkaaga si ay warbixin dheeri ah kaaga siiyaan baaritaanka.

Haddii aad doonayso in laguu soo diro foomka su'aalaha oo ku qoran afingiriis ama afnorwiiji waxaad la xiriiri kartaa KoRus.